

Waa maxay ujeeddada Hay'adda VT ee Kheyraadka Dabiiciga ah (ANR) Qorshaha Helitaanka Luqadda (LAP)? Ujeeddada LAP waa inay hagto shaqada ANR si ay ubixiso barnaamijyadeeda hab macno leh oo loogu siman yahay, adeegyadeeda iyo waxqabadyada dadka aqoonta Ingiriisiga xaddidan leh iyo dadka leh heerar kala duwan oo maqalka ah, aragga ah, ama hadalka ah, si waafaqsan sharciyada federaalka ee xuquuqda madaniga ah.

Waa maxay sharciyada xuquuqda madaniga ah ee federaalka? Waxaa jira dhowr sharci oo federaal ah oo xuquuqda madaniga ah kuwaas oo mamnuucaya takoorka ku salaysan asalka, midabka, caqiidada, asalka qaran, jinsiga, da'da, ama naafanimada, oo ay ku jiraan Ciwaanka VI ee Sharciga Xuquuqda Madaniga ah ee 1964, Sharciga Naafada Maraykanka, iyo Sharciga Dhaqancelinta.

Waayo dadka leh "Aqoonta Ingiriisiga xadidan"? Shakhsiyaadka aan ku hadlin afka Ingiriiska afkooda hooyo ahaan, isla markaana leh awood xaddidan oo ay ku akhriyaan, ku qoraan, ku hadlaan ama ku fahmaan afka ingiriisiga waxay noqon karaan dad leh aqoonta ingiriisiga ee xaddidan.

Maxay ANR ugu baahan tahay inay u hoggaansamaan sharciyada federaalka ee xuquuqda madaniga ah? ANR waxaa looga baahan yahay inay u hoggaansanto shuruucda xuquuqda madaniga ah ee federaalka iyo fulinta qawaaniinta sababtoo ah ANR waa hay'ad dowli ah oo hesha kaalmada maaliyadeed ee dawladda oo ka hesha dhowr hay'adood oo federaalka ah.

Maxaa ku jira LAP ka? LAP waxaa ku jira siyaasadda iyo shan qaybood oo hirgelin ah oo ku saabsan sida ANR ay u siin doonto macluumaad iyo adeegyo dadka aqoonta Ingiriisiga ah ee xadidan leh iyo dadka leh heerarka kala duwan ee maqalka, aragga iyo hadalka oo u baahan hoy si loogu taageero isgaarsiin waxtar leh.

Maxay yihiin shanta qodob ee fulinta? Waxyaabahaan waxay xaqiijinayaan in ANR ay bixiso sinnaan iyo helitaan macno leh ee barnaamijyada ah, adeegyada, iyo hawlaha hay'adda. Shanta qoddob ayaa kala ah: (1) in la ogaado dadka u baahan adeegyo isgaarsiineed, (2) ay bixiso adeegyo isgaarsiineed, (3) tababarto shaqaalaha iyo hay'adaha ka shaqeeya ee ka hela deeqaha iyo qandaraasyada sida loo raaco sharciyada xuquuqda madaniga ah ee federaalka, (4) ay bixiso ogeysiis guud oo ku saabsan adeegyada isgaarsiinta, iyo (5) la socoto LAP-da ee dib u cusboonaysiinta.

Maxay yihiin adeegyada isgaarsiinta ee ANR ay bixin karto? Adeegyada isgaarsiinta waxaa ka mid ahaan kara turjumaad afka, qoraal turjumidda macluumaadka muhiimka ah (oo sidoo kale loo yaqaan "dokumentiyada muhiimka ah") iyo qalabka caawimaadda oo waxtar u leh dadka leh heerarka maqalka, aragga iyo hadalka kala duwan.

Sidee dadweynuhu u bixin karaan faallooyin ku saabsan LAP?? Qoraalka qabyoodka ANR LAP ayaa diyaar u ah faalada dadweynaha. Faallooyinka ayaa la filayaa 5:00pm EST on Oktoobar 28, 2022. Fadlan u soo gudbi faallooyinkaaga: anr.civilrights@vermont.gov. ANR ayaa markaa tixgelin doonta faallooyinkan ka hor inta aan la dhammays tirin LAP-ka ugu dambeyn Diseembar 2022.

Wakaalada Vermont ee Kheyraadka Dabiiciga ah (ANR) waxay ku hawlgashaa barnaamijyadeeda, adeegyadeeda, iyo howlaheeda iyadoon lagu takoorin jinsiyadaha, diinta, caqiidada, midabka, asal ahaan, asal dal (oo ay ku jiraan aqoonta ingiriisi ee kooban), dhalasho, meesha dhalasho, naafada, da'da, xaaladda guurka, jinsiga, jihada galmada, aqoonsiga jinsi, ama naas nuujinta (hooyada iyo dhallaanka). Su'aalo ama Cabasho / Adeegyada Luqadda ee bilaashka ah: anr.civilrights@vermont.gov.